

Sharciga 6 Agoosto 1970, lamba. 44

Hakinta Xaqa Shaqa-joojinta

GUDDOOMIYAHA

GOLAHA SARE KACAANKA

Marka uu arkay Xaashida Koowaad ee Kacaanka iyo Xeerka 21 Oktoobar 1969 lamba. 1;
Marka uu arkay qod 143 iyo kuwa ku xiga ee Xeerka Shaqada oo lag meelmariyay D. L.
10 Agoosto 1969 lamba. 5.

Marka uu garowsaday baahida loo qabo in la hakiyo illaa laga soo saarayo amar cusub
xaqa loo leeyahay shaqa joojinta, dabcinta iyo jaridda shaqada iyadoo la tixgalinayo baahiyo
gaara ee dib u- dhiska iyo horumarka qaranka uu higsanayo Kacaanku;

Marka uu hubiyay oggolaashaha Golaha Sare Kacaanka;

WUXUU MEELMARIYAY

Qod. 1

Xaqa shaqa joojinta , dabcinta shaqata iyo jaridda waa la hakiyay illaa marlabaad la soo
celinayo.

Qod. 2

Inta xeerkaanu ka dhaqangalayo ciqaabta ku qoran qod. 390 Xeerka Ciqaabta Soomaaliya
ee quseeya loo shaqeeyaha waxaa lagu baddalay ciqaab ah saddex bilood illaa sanad xariga iyo
ganaax aha Sh. Som 600 illaa 2400 ganaax ah.

Qod. 3

Xeer kasta oo ka soo horjeeda ama aan la jaan qaadi Karin Xeerkaan waxaa loo
qaadanaya mid laalan.

Qod. 4

Xeerkaan si deg-degga ayu u dhaqan galayaa waxaana lagu faafinayaa Fafinta Rasmiga
ee Jamhuuriyadda Demoqaraadiga Soomaaliya.

Muqdisho, 6 Agoosto 1970.

Guddoomiyaha
Golaha Sare Kacaanka
S. Gaas Maxamed Siyaad Barre